

# Haddii aad haysato lambarka CPR ee Denmark waxaad masuuliyiinta dawladda ka helaysaa waraaqaha Boostada Dijital ah



## Waa maxay Boostada Dijital ah?

Boostada Dijital ah waa waraaqaha ka yimaadda masuuliyiinta dawladda. Waxay noqon kartaa bayaannada lacagta hawlgabka, waraaqaha ka yimaadda isbitaalka ee ku saabsan baaritaannada ama farriimaha ku saabsan meesha ka diyaar ah xarunta daryeelka carruurta ee maalintii. Mustaqbalka waraaqahaas waxaa si siyaado ah laguugu soo diri doonaa nidaamka dijital ah halkii lagaaga soo diri lahaa boostada waraaqaha ee caadi ah.

## Sida loo akhristo Boostada Dijital ah

Gal halkan [www.borger.dk](http://www.borger.dk) ama [www.e-Boks.dk](http://www.e-Boks.dk) adigoo isticmaalaya aqoonsigaaga NemID si aad u akhristo Boostadaada Dijital ah. Haddii aadan haysanin aqoonsiga NemID, waxaad ka dalban kartaa halkan [www.nemid.nu/dk-en/](http://www.nemid.nu/dk-en/) ama xaruntaada adeegga muwaadiniinta (borgerservice).

Waxaa muhiim ah in aad sheegto lambarkaaga telefoonka gacanta iyo cinwaankaaga emailka. Waxay taasi nidaamka kumbiyuutarrada u suurtoogelin doontaa in uu kuu soo diro farriin marka aad waraaqo cusub hesho. Gal halkan [www.borger.dk](http://www.borger.dk) ama [www.e-Boks.dk](http://www.e-Boks.dk).



### Halkan gargaar ka hel:

- Maktabadda xaafaddaada
- Xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice)

Akhristo warbixin ku saabsan Boostada Dijital ah oo ku qoran af Ingiriisi  
[www.lifeindenmark.borger.dk/digitalpost](http://www.lifeindenmark.borger.dk/digitalpost)

Gal halkan [borger.dk](http://borger.dk)

# Haddii aadan waraaqahaaga ku akhrisan karin nidaamka dijital ah, waa in aad ka reebnaato Boostada Dijital ah



## **Ka reebidda Boostada Dijital ah**

Haddii ka reebidda aanan lagu oggolaanin, waxaa kuu sii socon doonta in aad Boostada Dijital ah ku hesho waraaqaha kaaga yimaadda masuuliyiinta dawladda – xataa haddii aad geli weydo [www.borger.dk](http://www.borger.dk) si aad u akhrisato.

## **Waxaa laga reebi karaa in aad hesho Boostada Dijital ah haddii aad:**

- qabto dhibaatooyin luqadda ah
- qoran tahay ama ku diiwaangashan tahay in aad Denmark si joogto ah uga baxday
- qabto naafonimo kuu diidaysa in aad waraaqaha ku hesho nidaamka dijital ah
- aadan gurigaaga ku haysanin kumbiyuutar aad isticmaali karto oo uu ku xiran yahay khad internet oo ku filan
- guri laawe tahay
- dhibaatooyin camali ah kala kulanto soo qaadashada aqoonsiga NemID.

## **Sidee ayaan isaga reebi karaa?**

Si lagaaga reebo in aad Boostada Dijital ah ku hesho waraaqaha kaaga yimaadda masuuliyiinta dawladda, waa in aad laftigaagu timaaddo xarunta adeegga muwaadiniinta (borgerservice).

Gal halkan [borger.dk](http://borger.dk)